## Xuquuqaha Waalidka Habraacyada Dhowrista Xogta

Haddii aadan ku qancin go'aanka awooda aad u leedahay inaad bixiso ama kharashka ka qaybgalka waalidkaa, waxaad xaq u leedahay dhammaan xuquuqaha lagu xusay buug yaraha Xuquuqaha Waalidka ee Waxqabadka Dhallaanka.

Kani waxaa kujira xaqa aad u leedahay inaad gudbiso cabasho qoraal ah aadna u gudbiso Waaxda Carruurta iyo Dhallinta ee Ohio ama inaad isticmaasho dhexdhexaadiye amarka sarkaal sameeya dhageysi si loo xalliyo dhibaatada aad qabto.

Sidoo kale waxaad codsan kartaa dib u eegis aan rasmi ahayn adoo Iskuduwaha adeegga EI ka codsanaaya kaalmo ama adoo soo gudbinaaya codsi qoraal ah oo dib u eegista 30 maalmood gudahood laga bilaabo waqtiga aad heshay ogeysiiska awooda aad u leedahay inaad bixiso lacagta ama kharashka ka qaybgalka waalidkaa:

Waxqabadka Dhallaanka Ohio,
Waaxda Carruurta iyo Dhallaanka ee Ohio
P.O. Box 183204
Columbus, Ohio 43218

Ku dar bayaan ay ku qoran yihiin sababaha aad u aaminsan tahay in go'aanka la xariira inaad awood inaad bixiso lacag ama kharashka ka qaybgalka uu qaldan yahay iyo soojeedinada xalka noqon kara. Waaxdu waxay soo saari doontaa go'aan qoraal ah oo ay kula wadaageyso 20 maalmood gudahood oo laga bilaabaayo marka codsigaaga la helo si dib u eegis lagu sameeyo.

**Ohio** Department of Children & Youth

Help Me Grow Early Intervention

# NIDAAMKA LACAG BIXINTA



Xeerka Waxbarashada ee Shaqsiyaadka Qaba Naafada ama (Individuals with Disabilities Education Act, IDEA), wuxuu dhigayaa in qaar kamid ah hawlaha iyo adeegyada Waxqabadka Hore (Early Intervention, EI) la siiyo waalidiinta ayidoon laga qaadeyn wax lacag ah. Helida ilmo, qiimeynta iyo dib u eegista, horumarinta Qorshaha adeegga Qoyska ee Gaarka ah (IFSP), habraacyada Dhowrista Xogta, iyo adeegga iskuduwida waxaa maalgeliya dadwaynaha waxaana qoysaska lagu siiyaa lacag la'aan.

Baahida adeegyada EI oo dheeraad ah[1] waxaa lagu oggaadaa ayadoo loo maraayo nidaamka kooxda IFSP. In badan oo gaaraya ilaa 100 qaybood[2] kamid ah adeegyadaan EI-da ee dheeraad ah ayaa la bixiyaa sanadkasta oo IFSP[3] waxaana waalidiinta ilmo kasta oo u qalma lagu siiyaa lacag la'aan. Adeegyadaan waxaa lagu maalgeliyaa iskudarka sanduuqaha deegaanka, gobalka iyo kan federaalka, oo ay kujiraan caymiska waalidka iyo ilmaha, kadib marka la helo oggolaanshaha waalidka.

Kahor kulanka koowaad ee IFSP, Iskuduwaha Adeegga EI ayaa kuu sharixi doona sharciga Lacag Bixinta Nidaamka Ohio (ohioearlyintervention.org/federal-and-state-regulations) iyo, adigana, kula oggaan doona inay ku saarnaan doonto masuuliyada dhaqaalaha ee adeegyada EI-da loo baahan yahay ee ka badan 100 unug oo dawladdu maalgeliso sannadka IFSP.

Maku saarnaan doonto wax masuuliyad lacageed ah oo la xariirta adeegyada EI-da.

- haddii adiga ama cunugaaga ka diiwaangashan tihiin Barnaamijka Nafaqada Dheeraad ah ee Dumarka, Dhallaanka, iyo Carruurta (Special Supplemental Nutrition Program for Women, Infants, and Children, WIC) ama Ohio Medicaid, haddii dakhliga cunugaagu ka yar yahay ama lamid yahay u qalmida Ohio Healthy Start[4] carruurta aan caymiska kujirin, ama haddii qoyskaagu helo kharashaadka caafimaad oo xad dhaaf ah inta lagu jiro sanadka IFSP.

Iskuduwahaaga Adeegga EI ayaa sharixi doona qaybahaan. Haddii aadan buuxin u qalmidaan dhaqaalaha ama haddii aad doorato inaad wadaagto xogta dhaqaalaha, waxaad kaliya bixin doontaa adeegyada EI-da ee dheeraad ah ee ka bata 100 unug inta lagu jiro sanadka IFSP-da. Iskuduwahaaga Adeegga EI-da ayaa kuu sheegi doona sida maalgelinta EI-da u shaqeyso iyo dookhyada aad haysato maadamaa la abuuray IFSP.

Maadaama aad qayb ka tahay kooxda EI-da ee cunugaaga, waxaad gacan ka geysan doontaa adeegyada iyo sida adeeg kasta loogu baahan yahay si loo gaaro natiijooyinka IFSP. Iskuduwahaaga Adeegga EI-da ayaa kaala shaqeyn doona iskuduwida adeegyada loo baahan yahay iyo maalgelinta inta IFSP la abuuraayo ama la badelaayo.

1 Adeegyada Waxqabadka Waxbarashada Dhallaanka ee Dheeraadka ah waxaa kamid ah: baaritaanka maqalka, aaladaha teknoolajiyada ee maqalka iyo adeegyada, waxbarashada gaarka ah, baxnaaninta xirfada, baxnaaninta jirka, baxnaaninta luuqada hadalka iyo waxyaabo kale marka loo baahdo si loo gaaro natiijooyinka Qorshahaaga Adeegga Qoyska ee Gaarka ah (Individualized Family Service Plan, IFSP).
2 AKhidmadu waxay lamid tahay hal saac oo adeeg ah ama $100 oo ah khidmada aalada teknoolajiyada kaalmada. Qayb waqtiyada ama lacagta dollarka waxaa loo adeegsan karaa inay lamid tahay khidmad, sida ay go'aamiyeen kooxda IFSP.
3 Sanadka IFSP waxaa loola jeedaa sanadka laga bilaabaayo taariikhda marka koowaad ama IFSP-da sanadlaha ah la saxiixo, oo dhamaanaya maalinta ka horeysa saxiixa IFSP-da xigga.
4 Xog badan oo ku saabsan Ohio Health Start ayaa laga heli karaa: https://ohioearlyintervention.org/system-of-payments

Ohio Department of Children & Youth
Mike DeWine, Gudoomiyaha Gobalka Ohio

Kara B. Wente, Agaasimaha
Waaxda Carruurta iyo Dhallinta
(Waxaa dib loo eegay 07/2024)

Ururkaan waa bixiye iyo urur bixiya fursado loo siman yahay.

# BIXINTA ADEEGGA WAXQABADKA DHALLAANKA

Iskuduwahaaga Adeegga Waxqabadka Dhallaanka (EI) ayaa sharixi doona sharciga Nidaamka Lacag bixinta ee Ohio (ohioearlyintervention.org/federal-and-state-regulations) wuxuuna ku siin doonaa nuqul ah codsigaaga. Sharcigu wuxuu dhigayaa dookhyadaada lacag bixinta ku aadan adeegyada EI iyo oggolaanshaha waalidka ee loo baahan yahay ka hor inta aan kharashka adeegyada la dallacin.

Iskuduwahaaga Adeegga EI-da ayaa eegi doonaa adeegyada uu lacag la'aanta ku heli karo cunugaaga, iyo adeegyada laga yaabo inay tahay inaad lacag ku bixiso. Iskuduwahaaga Adeegga EI-da ayaa sharixi doona in oggolaanshahaaga loo baahan yahay ka hor caymiskaaga dadwaynaha iyo gaarka ah lagu dallacin inuu bixiyo kharashka adeegyada EI-da iyo xaqa aad u leedahay inaad racfaan ka qaadato u qalmida iyo go'aamada lacag bixinta.

## Isticmaalida Caymiska Gaarka ah

Ee badanaa ay bixiyaan shirkadaha, ururada ganacsiga ama kooxaha, caymiska gaarka ah waa caymiska kasta oo aan qayb ka ahayn barnaamijyada gobalka ama kuwa federaalka sida Medicaid ama Medicare.

Waa inaad bixiso oggolaansho ka hor inta aan caymiskaaga gaarka ah lagu dallicin kharashka adeegyada EI-da. Iskuduwahaaga Adeegga EI-da ayaa sharixi doona kharashka suurtagalka ah ee ka dhalan kara isticmaalida caymiskaga gaarka ah inuu bixiyo adeegyada EI-da, oo ay kujiraan kharashka suurtagalka ah ee muddada dheer ama dhuminta dheefaha haddii aad dhaafto xadidka ama inta la dabooli karo guud.

Haddii aad bixiso oggolaansho, waxaad sii wadi doontaa inaad bixiso lacagta joogtada ah ee caymiskaaga laakiin ma'ahan inaad bixiso qaybta caymiska kaaga soo aada ama lacaga la jaro 100 ka unug ee koowaad ee adeegyada EI-da.

Haddii aad haysato caymis gaar ah lana go'aamiyo inaysan ku saarneyn masuuliyad ah inaad bixiso kharashka adeegyada EI-da, ma'ahan inaad bixiso qoondada caymiska ama lacagaha lagaa jaro.

Iskuduwahaaga Adeegga EI-da ayaa kaa codsan doonaa oggolaansho mar labaad waqti kasta oo ay kordhaan cadadka lacagta, muddada, ama xajmiga adeegyada EI ee IFSP-gaaga.

## Isticmaalida Caymiska Dadwaynaha

Medicaid waa barnaamij caymis oo dadwayne. Marka shaqsi laga diiwaangeliyo Medicaid, majirto wax kharash ah oo uu ku bixinaayo adeegyada EI-da, ama lacagta lagu bixiyo caymiska, ama qoondada caymiska ama lacaga loo jarto adeegyada EI.

Marka la isticmaalo Medicaid, majirto halis ku aadan joojinta diiwaangelinta dheefaha Medicaid ee joogtada ah ama adeegyada la dhaafo, mana jirto sidoo kale hoos u dhac ku yimaada helida caymiska joogtada ah ama dheefo caymis oo kale oo kasta.

Iskuduwahaaga Adeegga EI-da ayaa kaa codsan doona oggolaanshahaaga si uu Waaxda Medicaid ee Ohio ula wadaago magaca cunugaaga iyo lambarka Medicaid sababo la xariira bixinta kharashaadka. Haddii aad bixiso oggolaansho, waad ka laaban kartaa oggolaanshahaaga.

## Caymiska Dadwaynaha iyo kan Gaarka ah

Haddii aad haysato caymiska dadwaynaha iyo kan gaarka ah labadaba, maku saarnaan doonto masuuliyad ah inaad bixiso kharashka adeegyada EI.

Iskuduwahaaga Adeegga EI-da waa inuu kaa codsado oggolaansho ka hor inta uusan isticmaalin caymiskaaga dadwaynaha ama kan gaarka ah marka uu kharashka adeegyada EI-da ku dalacaayo.

## Ilaalin Adiga laguugu talagalay

Adeegyada EI waa inaan laga daahin ama loo diidin ilmo u qalma sababo la xariira inaan la helin:

- oggolaanshaha waalidka ee lagu isticmaalo caymiska gaarka ah ee ilmaha ama waalidka si loo helo kharashka adeegyada EI;
- diiwaangelinta ilmaha ama waalidka ee barnaamijyada caymiska dadwaynahaha; ama
- oggolaanshaha waalidka ee lagu wadaago xogta lagu aqoonsan karo ilmaha ee lala wadaago barnaamijyada caymiska dadwaynaha.

Nidaamka EI waa inuusan ilmaha ama waalidka oga baahan inay ka diiwaangashan yihiin barnaamijyada caymiska dadwaynaha aysan noqon shuruud ku xiran inay helaan adeegyada EI, laakiin waa inay wadaagi karaan xogta ku saabsan nidaamka diiwaangelinta ee barnaamijyadaas. Nidaamka EI waa inuusan ilmo ama waalid ka diiwaangelin barnaamijyada caymiska dadwaynaha ama isticmaalida caymiska dadwaynaha ee ilmo ama waalid si loo bixiyo adeegyada EI haddii ilmaha ama waalidku uusan diyaar u ahayn in laga diiwaangeliyo barnaamijka caymiska dadwaynaha.

Marka la adeegsanaayo caymiska dadwaynaha ee ilmo ama waalid si loo bixiyo adeegyada EI, nidaamka EI:

- waa inuu helo saxiix, oggolaanshaha waalidka ee halka waqti ee lagu shaacinaayo xogta ilmaha lagu aqoonsan karo lalana wadaago barnaamijka caymiska dadwaynaha si loo bixiyo kharashka;
- waa inuu diyaariyaa adeegyada EI ee IFSP ee uu waalidku oggolaanshaha ka bixiyay.

Marka la oggaado inuusan waalidku lacagta bixin karin ilmaha waa in la siiyo dhammaan adeegyada EI ee la oggaado inuu u baahan yahay sida ku xusan IFSP waana in ayagoo lacag la'aan ah la siiyo ilmaha ama qoyska, oo ay kujiraan adeegyada EI ee dhaafay 100 unug inta lagu jiro sanadka IFSP.

Waalidiintu awooda inay bixiyaan kharashka waa inay masuul ka noqdaan bixinta kharashka adeegyada EI ee dhaafa 100 unug, oo ay kujiraan qayb bixinta lacagta caymiska gaarka ah iyo lacagaha la jaro, ee loo baahan yahay si loo gaaro natiijooyinka IFSP, marka laga reebo adeegyada EI ee aan kharash ahayn.

Waalidku waa inaan lagu dallicin kharash ka badan kharashka saxda ah ee adeegyada EI (oo muujinaya lacag kasta oo laga helay ilo kale oo ah lacag lagu bixiyay adeegyadaas).

Ilmo ama waalid leh caymis gaar ah ama caymis dadwayne waa inaan si aan habbooneyn loogu dallicin kharash badan oo ka badan kan ilmaha ama waalidka aan haysan caymiska dadwaynaha ama kan gaarka ah.

Adeegyada EI waa inaan laga daahin ama loo diidin ilmaha uusan waalidkiis awoodin inuu bixiyo kharashka adeegyada EI.